Co-funded by
the European Union

CASHARKA 2: SAHMINTA DALKAAGA

Qore: Larissa Aksinovits

Sahminta dalkaaga – sameynta soo-bandhigid muuqaal ah oo ku saabsan waddankaaga.

Macnaha Guud

Mashruucu wuxuu xiriir la leeyahay mowduucyada aqoonsiga (aqoonsiga dhaqamada kala duwan, dareenka lahaanshaha iyo faanka meesha aad ku nooshahay) iyo aqoonta (qeybaha kala duwan ee aqoonta – taariikhda, juqraafiga, farshaxanka iyo dhaqanka)

Ujeeddo

Si loo horumariyo xirfadaha aqooneed ee soo socda: akhrinta, qorista, hadalka, dhageysiga, raadinta macluumaadka, qorsheynta iyo maaraynta wakhtiga, shaqo kooxeedka iyo iskaashiga. Caadi ahaan, ardayda fasalka luqadda hooyo waxay la kulmaan caqabado marka ay ka hadlayaan ama qorayaan arrimaha la xiriira dhaqanka, taariikhda, juqraafiga, ciidaha, sababtoo ah waxay arrimahan kaga hadli jireen luqadda wax lagu baro ee waddanka ay joogaan oo ah Finland wayna ku adkaataa inay u beddelaan luqaddooda afka hooyo, maadaama ay ka maqan tahay eray-bixinta.

Waxyaabaha ku jira

1. Fikir ururin: Ardayda waxaa la weydiinayaa inay soo ururiyaan oo qoraan fikradaha ku saabsan waxyaabaha xiisaha leh ee Finland: astaamaha qaranka, taariikhda, dadka, hal-abuurka, cuntada, goobaha, suugaanta iyo ciyaaraha.

2. Macallinku wuxuu ururinayaa fikradaha ardayda wuxuuna sameynayaa liis guud, ka dibna wuxuu ardayda u qeybinayaa fikradahaas kala duwan casharka xiga.

3. Ardayda waxaa loo kala qaybinayaa kooxo (ama waxay ku sii jirayaan isla kooxihii casharkii hore), ardaydu waxa ay helayaan shan waxyaalood oo ay soo raadiyaan macluumaadkooda. Waa inay ardaydu ka wada hadlaan mowduucyada loo qeybiyey oo ay isku raacaan in arday kasta uu doorto mawduuc ka duwan kan kale. Waxaa laga yaabaa inay u baahdaan caawimaadda macallinka.

4. Ardaydu waxay bilaabayaan raadinta macluumaadka waxayna qorayaan qoraallo ku saabsan mawduucyadooda. Waxay sidoo kale raadinayaan sawirro si ay ugu muujiyaan qoraalladooda ama iyaga ayaa sawirro u sameeynaya. Macallinku wuu daabacayaa sawirrada haddii loo baahdo.

5. Tallaabada xigta waxaa la sameynayaa boorar (hawlaha waxaa ka mid ah isku dhejinta qoraallada iyo sawirrada, naqshadeynta boorarka).

6. Tallaabada ugu dambaysa waxaa la sameynayaa soo bandhigid muuqaal ah. Ardaydu mar kale ayay akhrinayaan qoraalkooda, ka dibna waxay aadi karaan meel degan oo ku dhex taal dhismaha iskuulka si ay ugu duubaan muuqaal soo bandhigid ah iyagoo adeegsanaya taleefannadooda.

Waa wax macquul ah in la tixgeliyo in mashruucu qaato 4–5 toddobaad si loo dhammeystiro.

Co-funded by
the European Union

Qaabka

Shaqo kooxeed

Hagaajinta

Ardayda heerarka kala duwan ee luqadda way ka qayb qaadan karaan hawshaan. Kuwa aan aad u hadlin weli way ka qeyb qaadan karaan shaqo kooxeedka iyagoo dhageysanaya ama ka shaqeynaya sida duubista muuqaallada.

Qiimayn

Waxqabad xiiso leh ayeey u ahayd ardayda. Xitaa ardayda aan aad u dhiirranayn way ka qayb qaateen (inkastoo ay qoreen qoraallo aad u gaaban). Qaar ka mid ah ardayda aad bay ugu degdegayeen raadinta macluumaadka, qorista qoraallada iyo samaynta muuqaallada. Kooxaha qaar waxay ku qaadatay saacado dheeraad ah si ay mashruuca u dhammeystiraan. Kooxaha qaar waxaa ku jirey arday ay ku adagan tahay qoraallada iyo kooxo aad u hal-abuur badan oo wada hadlayey, farxadduna aad bay u badnayd.